BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka MMRV

(Jadeecada, Qaamo-qashiirta, Rubella iyo Bus-bus ama Hablo-baas)

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Waxaad eegtaa www.immunize.org/vis

Las hojas de información sobre vacunas están disponibles en español y en muchos otros idiomas. Visite www.immunize.org/vis

1 (Jadeecada, Qaamo-qashiirta, Rubella iyo Bus-bus ama Hablo-baas)

Jadeecada, Qaamo-qashiirta, Rubella (Jadeecada Jarmalka), iyo Bus-busta ama (hablo-baasta) ayaa noqon kara cudurro daran:

Jadeecada

- Waxay keentaa finan yaryar, qufac, duuf dareera, indho cuncun, iyo xummad.
- Wuxuu u horseedi karaa infakshanka dhagta, oof-wareen, qalal (suuxdin), dhaawac maskaxeed, iyo geeri.

Qaamo-qashiirta (Qanjo-Bararka)

- Wuxuu keenaa xummad, madax-xanuun, iyo qanjo barar.
- Wuxuu u horseedi karaa dhago-beel, qoorgooye (infakshanka ku dhaca xuubka maskaxda iyo xangulada), infekshinka ganaca ama beeryarada, barar xanuun leh ee xiniinyaha ama ugxan sidaha, iyo, si naadir ah, geeri.

Rubella (Jadeecada Jarmalka)

- Wuxuu keenaa finan yaryar, xummad dhexe, iyo lafo-garaac (inta badan dumarka).
- Haddii haweenay ay ku dhacdo rubella iyadoo uur leh, way dhicin kartaa ama ilmaheedu wuxuu ku dhalan karaa wax u dhinnaan dhalasho oo halis ah.

Bus-bus (Hablo-baas)

- Wuxuu keenaa finan yaryar, cuncun, xummad, iyo daal.
- Wuxuu keeni karaa caabuq maqaar aad u daran, nabarro, oof-wareen, dhaawac maskaxda gaara, iyo dhimasho.
- Waxa dhici karta inuu sannadaha dambe ugu soo noqdo finan yaryar ahaan la dhaho soo-baxyo xanuun badan.

Cudurradani waxay ku faafi karaan qof ka qof iyaga oo mara hawada. Bus-busta ama hablo-baasta ayaa ku faafi karta taabshada dareeraha ka yimaad biyo-galka hablo-baasta.

Kahor tallaallada, cudurradani waxay aad ugu badnaayeen gudaha Maraykanka.

2 Tallaalka MMRV

Tallaalka MMRV ayaa la siin karaa carruurta da'da 1 illaa 12 sanno jirta si looga ilaaliyo iyaga afar tan cudur.

Waxa lagu talinayaa laba qiyaasood oo tallaalka MMRV ah:

- Qiyaasta hore markay yihiin da'da **12 illaa 15 bilood**
- Qiyaasta labaadna markay yihiin da'da **4 illaa 6 sanno**

Kuwani waa da'aha lagu taliyey. Laakiin carruurta ayaa heli kara qiyaasta labaad illaa da'da 12 sanno illaa inta laga joogo ugu yaraan 3 bilood kadib qiyaasta hore.

Carruurta ayaa laga yaabaa waliba inay u helaan tallaaladan 2 duritaano kala gaar ah: **Tallaalada MMR** (jadeecada, qaamo-qashiirta, rubella) iyo **bus-buska (hablo-baasta)**.

1 Duritaan (MMRV) ama **2 Duritaano** (MMR & Bus-buska)?

- Labada kal doorashaba waxay bixiyaan kahortag isku mid ah.
- Hal duritaan ayay ka yar tahay MMRV.
- Carruurta u qaadata qiyaasta ugu horreysa ahaan MMRV ayaa yeelatay qandhooyin iyo suuxdinno qandho-la-xidhiidha ka badan (ku dhawaad 1 markay yihiin 1,250) marka loo eego carruurta qaadatay qiyaasta ugu horreysa ee ah duritaanno tallaallo kala gaar u ah MMR iyo hablo-baasta isla maalin isku mid ah (ku dhawaad 1 markay yihiin 2,500).

Dhakhtarkaaga ayaa ku siin doona macluumaad in taa ka badan, oo ay ku jiraan Bayaannada Macluumaadka Tallaalka loogu talagalay tallaallada MMR iyo Hablo-baasta.

Qof kasta oo 13 sanno jir ama ka weyn ee u baahan kahortag cudurradan ayaa ah inay helaan tallaallada MMR iyo ka Hablo-baasta iyaga oo ah duritaanno kala gaar ah.

MMRV waxa la siin karaa xilli la mid marka tallaallada kale la siinayo.

3 Carruurta qaarkood ma ah inay qaataan tallaalka MMRV

Carruurta ma aha in la siiyo MMRV haddii ay:

- Waligood daareen-celin xasaasiyad halis nolosha galiya ay ku yeesheen qiyaas tallaal MMRV horay loo siiyay, ama midkoodba tallaalka MMR ama hablo-baasta.
- Waligood daareen-celin xasaasiyad halis nolosha galiya ay ku yeesheen *qayb* kasta oo tallaalka ka mid ah, oo ayna ka midka yihiin jelatin ama antibayootik neomycin. U sheeg dhakhtarkaaga haddii u ilmahaaguu leeyahay xasaasiyado kasta oo daran.
- Leeyahay HIV/AIDS, ama cudur kale oo saameeya habdhiska difaaca.
- Lagu daawaynayo daawo saamaynaysa habdhiska difaaca, sida isteeroydhka afka laga qaato illaa 2 toddobaad ama in ka badan.
- Uu leeyahay nooc kansar uun ah
- Laga dawaynayo kansar oo la isticmaalayo shucaac ama daawooyin

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

La xidhiidh dhakhtarkaaga haddii ilmuhu:

- U leeyahay taariikh suuxitaan, ama u leeyahay waalid, qof walaalkood ah oo leh taariikh suuxitaan.
- U leeyahay waalid, qof walaalkood ah oo leh taariikh dhibaatooyinka nidaamka difaaca.
- Uu waligiiba yeeshay unugyada dhiig xinjirowga sameeya oo aad u yaraaday, ama cilad dhiig oo kale.
- Lagu shubay dhiig dhawaan ama qaatay waxyaabo kale oo dhiigga laga sameeyo.
- Uur leeyahay.

Dadka si dhexdhexaad ah ama si daran u xanuunsanaya xilliga mudista la loo qabtay waa inay badanka sugaan inta ay kasoo kabanayaan kahor qaadashada tallaalka MMRVV. Carruurta si meel dhexaad ah u xanuunsada ayaa la siin karaan tallaalka.

Waxaad macluumaad dheeraad ah weydiisaa dhakhtarkaaga.

4 Waa maxay halista ka iman karta Tallaalka MMRV?

Tallaalka, sida daawo kasta, ayaa suurtagal ah in uu sababo dhibaatooyin culus, sida dareencelin ama xasaasiyado daran. Khatarta uu tallaalka MMRV ku keeni karo dhibaato culus, ama geeri, aad ayeey u yar tahay.

Qaadasha tallaalka MMRV ayaa aad uga badbaado badan ku dhicitaanka jadeecada, qaamo-qashiirta, rubella ama bus-bus (hablo-baas)

Dadka qaata tallaalka MMRV badankoodu wax dhib ah kalama kulmaan.

Dhibaatooyin khafiif ah

- Qandho (qiyaastii 1 ilmo 5tiiba)
- Finan aan badnayn (qiyaastii 1 ilmo 20kiiba)
- Bararka qanjaha dhabanka ama qoorta (naadir)

Hadday dhibaatooyinkani dhacaan, inta badan waa 5-12 maalmood gudahood qiyaasta tallaalka kadib. Waxay dhacaan badi sida yar qiyaasta labaad.

Dhibaatooyinka dhexdhexaadka ah

- Suuxidda ka timaad qandhada (ku dhawaad 1 ilmo marka loo eego 1,250 ee qaata MMRV), Badiyaa 5–12 maalmood ka dib qiyaasta ugu horreysa. *Waxay u dhacaan badi si sii yar marka tallaalada MMR iyo hablo-baasta isla mar lagu siiyo booqashada iyaga oo ah duritaano kala gaar ah (ku dhawaad 1 ilmo marka loo eego 2,500 la siiyo tallaalka), iyo si naadir ah kadib qiyaasta 2aad ee MMRV.*
- Nooca unugyada dhiig xinjirowga sameeya oo aad u yaraada ku meel-gaar haan, taasoo keeni karta khalkhal dhiigbax (illaa 1 ilmo marka loo eego 40,000ba).

Dhibaatooyinka daran (aad dhif u ah)

Dhowr dhibaatooyin oo daran ayaa laga soo waramay kadib tallaalka MMR, waxa laga yaabaa inay sidaas oo kale dhacdo kadib tallaalka MMRV. Kuwaas waxa ka mid ah dareen-celinno xasaasiyad daran (in ka yar 4 halkii milyanba), iyo dhibaatooyinka sida:

- Dhago-la'aanta.
- Suuxdinno muddo dheer, miyir-beel, miyirka oo hoos u dhaca.
- Dhaawac maskaxeed daa'im ah.

AUTH: P.H.S., Act 42, Sect. 2126.

Translation provided by the Immunization Action Coalition

5 Maxaa dhacaya haddii ay jiraan dareen-celin darani?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?

- U fiirso wixii kasta adiga ka wewelsiiya, sida calaamadaha fal-celinta xasaasiyadda daran, qandhada aad u sarreysa, ama dabciga isbeddela.

  Calaamadaha ficil-cellinta xasaasiyadda daran waxaa ka mid ah firiiricyo, wajiga iyo cunaha oo barara, neefsiga oo dhib ku noqda, wadne garaac badan ama dawakhsanaan iyo tabcaanimo. Taasi waxay bilaabmi doontaa dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood kadib tallaalka.

Maxaan sameeyaa?

- Haddii aad u maleyso inay tahay ficil-celinta xasaasiyadda daran ama xaalad degdeg ah oo aan la sugin karin u wac 9-1-1 ama qofka gee isbitaalka kuugu dhow. Haddii kale, u wac dhakhtarkaaga.
- Markaa waxa ka dambeeya, ficil-celinta waa in warbixin laga siiyaa Nidaamka Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS). Dhakhtarkaaga ayaa xereyn kara warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaas samayn kara adiga oo u mara degelka VAERS ee ku yaal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS waxa kaliya ee loogu talagalay in looga warbixiyo falcelinta. Iyagu ma bixiyaan talo caafimaad.

6 Dhaawaca Tallaalka Qaranka Barnaamijka Magdhawga

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waa barnaamij federaal loo abuuray magdhowga dadka laga yaabo ay wax yeelleeyeen tallaallada qaarkood.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyaga oo waca **1-800-338-2382** ama booqda degelka VICP ee ku yaal **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

7 Sidee ayaan intaa wax ka badan ku ogaan karaa?

- Waxaad weyddiisaa dhakhtarkaaga.
- Waxaad wacdaa waaxda caafimaadka deegaankaaga ama gobolkaaga. 1-888-767-4687
- La xiriir Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Booqo degelka CDC ee ku taal **www.cdc.gov/vaccines**

DCH-1494SO

Vaccine Information Statement (Interim)

MMRV Vaccine

5/21/2010 Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Office Use Only

Si ay bixiyeyaasha daryeel caafimaad u helaan xaaladda saxda ah ee warka talaalka, qiimeynta warka, iyo jadwalka/kaltanka loogu taliyay talaalada mustaqbalka, waxa warka loo diri doonaa Michigan Care Improvement Registry (Diiwaanka Hagaajinta Daryeelka Michigan). Shakhsiyaadku ama dadku waxa ay xaq u leeyihiin in ay bixiyahooda daryeelka caafimaad ka codsadaan in aanuu Diiwaanka u gudbin warka.